


SU'AALAHAA UGU BADDAN EE SOO JEEDINTA BAABUUR DHIGASHADA MAGAALADA COLUMBIA – SHAQOYINKA

Waaxda Gaadiidka Ee Seattle (SDOT) waxay maaraysaa baabuur dhigashada iyo taraafikada waddooyinka Magaalada. Waaxda Gaadiidka Ee Seattle waxay soo sii daysay soo jeedin loogu talagalay isbedelo lagu samaynayo meelaha baabuurta la dhigto ee u dhow Waddada Rainier Avenue ee kutaala Magaalada Columbia. Faah-faahinada lasoo jeediyay waxaa lagu muujiyay khariidada.

Sidee shaqaalaha aan ku noolayn meel u dhow goobta oona usoo safra meesha shaqada u raacayaan isbedeladaan lasoo jeediyay?

- Taraansiit ayaa u noqon kara doorasho qaar shaqaalaha kamid ah. Khadka waddada tareenka fudud wuxuu shaqeeyaa laga bilaabo 5 SUBAXNIMO illaa 1 SUBAXNIMO maalamaha todobaadka ah. Meesha sidoo kale waxaa ka adeega waddooyinka Mitrowga Degmada County 7, 9, 50, iyo 106. Qaar kamid ah shaqaalaha waxay xaq u yeelan karaan soo QAADISTA ORCA midaas oo bixisa kaydsho ujro ama kiro gaari gaaraysa illaa boqolkiiba 50% ee ah Mitrowga Degmada County, Khadka Waddada Tareenka Fudud ee Sound Transiit, iyo taransiitoy goboleed kale.
- U wad gaariga oona dhigo meel kamid ah meelahaan soo socda:
 - Dhigo gaariga goobaha RPZ 29. Ee loogu talagalay shaqooyinka ah gudaha balaarinta lasoo jeediyay ee ah meesha Aaga Mamnuuca ka ah in Gaariga la dhigto (RPZ), Dadka loo shaqeeyo waxay u iibin karaan oggolaanshaha Aaga Mamnuuca ka ah in Gaariga la dhigto shaqaalahooda. Meesha waxaa kamid ah Waddada Rainier Ave S iyo dhinacyada waddooyinka u dhaxaysa S Dawson St iyo S Angeline St. Oggolaanshaha ama fasaxa meesha lagu galo hadda wuxuu qiimihiisa yahay \$65 wuxuuna shaqeeyaa illaa labbo sanno. Foomka codsiga waa in uu buuxiyo oona sixiixo qofka shaqada iska leh ama qofka asaga matala ama u dhigma. Macluumaadka waxaa laga helayaa boggaan internetka ah www.seattle.gov/transportation/parking/lightrail_biz.htm. Xafiiska Oggolaanshaha ama fasaxa Waaxda Gaadiidka Ee Seattle ee Aaga Mamnuuca ka ah in Gaariga la dhigto waxaa laga wici karaa lambarkan 206-684-5086.
 - Waxaa la heli karaa meelo gaari dhigasho khaas ah oo bilo ama maalin le ah oo ka baxsan baabuur dhigashada-waddada



Isbedelada Lasoo jeediyay

- La bixiyo, \$1/saacadii, 8 SUBAXNIMO – 8 HABBEENIMO Asniinta-Sabtida, Xadka 2 saacadood ah (80 boosas)
- RPZ, 7 SUBAXNIMO-6HABBEENIMO, Asniin-Jimco, 2 saacadood aan ka ahayn haddii lagu oggolaado (390 boosas)
- Xaddadka Wakhtiga Lacag La'aanta ah, 2 saacadood 7 SUBAXNIMO – 6 HABBEENIMO Asniinta - Sabtida (40 boosas)
- Calaamada Tusinaysa Gaariga In Aan La dhigan karin
- Samaynta Meelo Gaarigu Ka-wareego
- In loo Wareejiyo Hal Boos Kaliya Meel Rakaabka laga Qaado 5 GALABTII – 2 SUBAXNIMO
- Ku dar Boosas Cusub oo Baabuurta la dhigto oo RPZ 29 ah



Seattle
Department of
Transportation

- Meelaha gaariga la dhigto ee aan mamnuuca ahayn. Ma jiraan wax isbedelo ah oo loo soo jeediyay meelaha gaariga la dhigto ee ka baxsan kudhowaadka 2-3 dhismo laga bilaabo waddada shaqada Magaalada Columbia. In la dhigto gaariga inbaddan oo kamid ah waddooyinkan waxay ahaan doonaan kuwo 'aan mamnuuc ahayn' oo ku xiran xad wakhti ama nidaamyo kale. Nidaamyada gaari dhigashada hadda ah waxaa laga arki karaa Khariidada Gaari dhigashada Seattle ee kujirta boggaan internetka ah <http://web6.seattle.gov/sdot/seattleparkingmap/>.

Sidee midaan u saamayn doontaa halka ay macaamiisha/dadka booqashada ahi dhiganayaan baabuurtooda?

- Isbedelada baabuur dhigashada (xadadka wakhtiga iyo baabuur dhigashada lacagta ah) waxaa loo sameeyay si loo badiyo helida meelo baabuurta la dhigto loogana dhigo waddooyin ganacsi waddada ganacsiga si loo wanaajiyo imaatinka dadka booqashada ah iyo macaamiisha. Isbedelada lasoo jeediyay kudhowaadkii 80 tan jeer ayay xadidayaan meelaha ku yaala qalbiga Magaalada Columbia waxayna ka dhigayaan goobo la dhigto baabuurta. Xadka wakhtiga wuxuu ahaan doonaa 2 saacadood, ayada oo ay la jirto awooda ah in la iibsado 3 saacadood oo wakhti ah laga bilaabo 5 GALABNIMO. S cirka koowaad wuxuu ahaanayaa \$1 saacadii, ayada oo ay la jirto sicirada saamaynaya 8 SUBAXNIMO illaa 8 HABBEENIMO, Asniinta illaa Sabtida. Baabuur dhigashada ka baxsan kudhowaadka hal dhismo ee waddada Rainier waxay ahaanaysaa mid bilaash ah.

Sideen u codsan karaa isbedel aaga ah ama u bixin karaa faalooyin iyo wel-welo kale oo gaar ah?

- Uga jawaab su'aalaha tooska internetka ah cinwaankan www.surveymonkey.com/r/SDOTCC marka ay tahay Febraayo 27, 2017.
- Nagala soo xiriir cinwaankan Columbiacityparking@seattle.gov ama lambarkan 206-733-9026

Kadibna maxaa xiga?

- Waaxda Gaadiidka Ee Seattle waxay qorshaynaysaa in ay soo saarto qorshe kama dambays ah oo loogu talagalay isbedelada lagu samaynayo meelaha baabuurta la dhigto kudhowaadka Abriil 2017 waxaana suurtoagal ah in isbedelada la sameeyo dayrta 2017.